

Skyfritt – Degaanka koriinka loo dhan yahay ee Bergen

Skyfritt waa qorshaha degmada Bergen ee degaan wanaagsan oo koriin oo loo dhan yahay. Hadafku waxaa weeye in carruurta iyo dhallinyarada ayna kala kulmin dhibaato iyo dhaqan meel uga dhac ah, oo uga imanaya carruurta kale, dhallinyarada ama dadka waaweyn midkoodna.

Qorshaha waxaa la siiyey magaca ah Skyfritt, **sababta oo ah in carruurta ama dhallinyaradu ayna dareemin in dushooda daruuro madoobi dul heehaabayaan.** Waxaan rabnaa in dhamaanteen kuwa ku koraaya Bergen ku faraxsanaadaan, helaan fursado ay ku hurumarno oo ay dareemaan in ay ka mid yihiin.

Iyada oo la adeegsanaayo Skyfritt waxay degmada Bergen xoojineysaa dadaalka ka hortagidda, ogaanshaha iyo wax ka qabadka dhibidda gudaha xanaanada carruurta, dugsiyada iyo goobaha xilliyada firaaqada ah lagu ciyaaro.

Doorka muhiimka ah ee dadka waaweyn

Carruurteena iyo dhallinyaranteenu waxay la kulmi doonaan dad waawayn oo awood u leh iney arkaan oo ku soo daraan dhammaan- ha ahaato xannaanda carruurta markey ku ciyaarayaan, fasalada ama xiliga firaaqada ee SFO ga, saacada ciyaarta gudaha ee dugsiyada dhaqanka ama garoonka banooniga/kubbadda.

Markasta waa qofka wayn masuuliyadiisa inuu abuurto degaan nabadeed oo wanaagsan oo ciyaareed, waxbarasheed iyo mid xilliga firaaqada.

Furuhu waa degaan koriin oo wanaagsan.

Sidee baan u dhimi karnaa dhibidda iyo meel uga dhicidda? Jawaab sahlan looma hayo tan, laakiin waxaan ognahay iney wax badan arintu ku saabsan tahay degaan amni ah oo wanaagsan in loo abuurto carruurteenna.

Skyfritt waxay ka koobadan tahay siddeed khidaddood oo kala duwan si loo sugo degaan koriin oo wanaagsan. Ka akhriso war dheeraad ah ee khidadaha halkan.

Hadafka Skyfritt waa in carruurta, dhallinyarada iyo waalidiintu ay:

- dareemaan in la dhageysto, dhab loo qaato waxay shegaan ayna gargaar ka helaan arimaha ku saabsan dhibidda iyo meel uga dhaca.
- garanayaan meesha ay la xirriiri karaan si ay u helaan caawimaad iyo taageero
- garanayaa waxay ka filan karaan oo ay ka dalban karaan xannaanada carruurta, dugsiyada iyo hogaamiyeyaasha madalaha xilliyada firaaqada

Shaqaalaha xannanada carruurta, dugsiyada iyo hogaamiyeyaasha madalaha xilliga firaaqada waa iney dareemeen inay helayaan taagero, la talin iyo kor u qaadis aqoontooda si ay u noqdaan kuwo sida ugu fiican awood u leh si ay u ilaaliyaan carruurteena- mustaqbalkeena.